

Sidee baa qof loogu soo diraa QPASTT

Dadka waaweyn, carruurta, dhalinyarada, qoysaska iyo cidkastoo kaalmo uga baahan QPASTT wey isi soo gudbinkartaa ama cid kale oo ka wakiil ah baa soo gudbinkarta, inta aan ka ahayn caruurta ka yar 18 sano oo qofka soo gudbinayaa looga baahanyahay in uu ogolaansho ka haysto walidka, hatuusan waalidka caruurtaas asagu ahayn.

Haddii ilmo jira ilaa 12 sanno la soo gudbiyo, waalidka ama masuulka ilmahaas waxaa la weydiinayaa lagana rabaa inuu ka qaybgalo kulanka koowaad ee lagu arkayo ilmahaas.

Dhammaan codsiyada waxaa loo soo gudbinayaa xafiiska dhexe ee QPASTT. Foomka codsiga waxaa laga heli karaa websitka QPASTT ee ah www.qpastt.org.au ama la xariir QPASTT.

Waxaa kaloo la xiriiri kartaa telefonka QPASTT si aad u heshid akhbaar dheeraad ah.

Street Address:

**28 Dibley Street
Woolloongabba QLD 4102**

Postal Address:

PO Box 6254, Fairfield, QLD 4103

Phone: (07) 3391 6677

Fax: (07) 3391 6388

www.qpastt.org.au

Email: admin@qpastt.org.au



Xagee bey ku taal QPASTT?

QPASTT waxay ku taal goobo kala duwan sida

Brisbane, Logan, Gold Coast, Bartamaha Queensland , Waqooyiga iyo Waqooyiga fog ee Queensland.

Xafiiska dhexe ee QPASTT's wuxuu ku yaal


Brisbane Multicultural Centre ee adareesku yahay 28 Dibley St, Woolloongabba. Xafiisku wuxuu socod yar u jiraa ama u dowyahay Ipswich Road.

Train: Park Road Railway Station (500 mitir laga bilaabo Waddada Dibley)

Bus : PA Hospital Busway

Wixii maclumaaad dheeraad ah ee ku saabsan gaadiidka dadweynaha iyo sida ugu sahan ee lagu imaan karo QPASTT la xiriir Transinfo 131230

Ama soo wac QPASTT (07) 33916677



QPASTT

**Barnaamijka Queensland ee ka
soo samata baxayaasha dhibka
yo Jirdilka Inc**



QPASTT waa xubinta

Queensland ee

**Kullanka Adeegyada Australiya ee
loogu talagalay Ka samatabaxayaasha
Dhibka & Jirdilka (FASSTT)**

Xafiiska Dhexe:

**Brisbane Multicultural Centre
28 Dibley Street
Woolloongabba, Brisbane, QLD 4102**

Barnaamijka Caawimaada Ka samata baxayaasha Dhibka iyo Jirdilka QLD Inc

Maxay sameysaa QPASTT ?

QPASTT waa hay-ad ka saacida qaxootiga arimaha la xariira dhibkii ay soo mareen ka hor intii aysan iman Australia

QPASTT waxay caawimaad siisaa dadka:

- Soo maray jirdil
- Arkay qof u dhow oo la jirdilayo
- Soo marey dhib intii lagu jirey dagaalka ka dhacay dalalkooda
- Dadka lagu dhibay xibin ka ahaansho urur siyaasadeed, diimeed, ama jinsiyadooda
- Ubaqay naftooda waqtigii dagaalka

Adeegyo nooceee ah ayey bixisaa QPASTT ?

- **Latalinta dadka dhibka & Jirdilka** ka soo badbaaday ee iminka ku nool Australia iyo kuwa fiisaha qaxoodiga iminka dalbanaya
- **Udoodista & Latalinta Dhalinyarada & Carruurta** da'doodu u dhaxeeyso 4-24 sano ee ayaga ama waalidkood soo mareen jirdil iyo dhib kale ee la xariira qaxootinimada
- **Tababarka & Horumarinta Aqooneed** ee shaqaalaha caafimaadka iyo kuwa kale ee la shaqeeya dadka kasoo badbaaday jirdilka iyo dhibka laxariira qaxootinimada

Adeegyada soo socda lagama heli karo dhammaan goobaha ay QPASTT xaafiiyada ku leedahay sida:

- **Barnaamijka Dhalinyarada** jirata 12-24 sanno,

ee ubaahan:

- Udooddista iyo latalinta dhalinyarada khatarta ugu jira inay is dhibaateeyaan ama naftooda waxyeelaan ama isdilaan
- Udoodista iyo taageerid da 'yarta dhigata skuulada iyo wacyigelinta shaqaalaha la shaqeeya ardayda
- Skuul holidayda oo barnaamijyo loo sameeyo ardayda
- Homweek kalaab laga saacido ardayda
- **Latalinta Qoyska** sida korinta carruurta iyo habka loola dhaqmo caruru markey bilaaban dhaqan uusan raali waalidku ka ahayn
- **Barnaamijyada Bulshada ee Ka hortaga burburka qoyska waxaan ka mid ah:** Barnaamijka dhisitaanka Qoysas adag iyo barnaamijka lagu wacyigelinayo qoyska cusub ee iminka yimid Australia sistemka wadanka ka jira.
- **Taageerada taageerayaasha qoysaska**
- **Barnaamijka horumarinta Bulshada** oo loogu talagalay bulshoooyinka asal ahaan qaxootiga ka soo jeeda
- **Barnaamijka wacyigelinta macalimiinta iskuulaadka** si ay u taageeraan waxbarashada iyo horumarinta ardeyda asal ahaan ka soo jeeda qaxootiga

QPASTT waxay daleecaysaa jirdilka waxayna u araktaa jebinta xuquuqda bani'aadamka oo aan la aqbaleynin waxayna mid ka tahay hay'adaha la dagaalamaan fici-ka jirdilju in uu saameyo aduunka oo dhan.

QPASTT waa xubin ka tirsan Golaha Dhaqan celinta Caalamiga ee Dhibanayaasha Jirdilka [IRCT]